



Fariintani waxaa la soo geliyay iyada oo ah Ingiriisi waxaana dhawaan iyada oo ah Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt la soo gelin doona <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 13, 2022

Ku socota: Xubnaha bulshada I/DD, hawl wadaagayaasha Qabiilka iyo shaqaalaha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Kordhinta muddada xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha ee federaalka

Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ayaa [dib u cusbooneysiisay xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee federaalka \(PHE\) ee loogu talagalay COVID-19](#) ilaa Janaayo 11, 2023.

PHE ayaa u oggolaatay Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo dowladda federaalka in ay qaadaan tallaabo ay ku ilaalinayaan caafimaadka dadka helaya adeegyada oo ka dhex shaqeynaya nidaamka naafanimada korriinka ee Oregon.

Muddo kordhintani waxay noo saamaxaysaa wakhti dheeraad ah oo aanu ugu diyaar garowno dib ugu soo noqoshada nidaamyadeenii caadiga ahaa. Tusaalooyinka tallaabooyinka ku meel gaarka ah iyo waxyaabaha la iska dhaafay ee joogsan doona marka PHE-du joogsato waa ka mid ah:

- Wicitaanada fiidiyowga si loo sameeyo heerka daryeelka (LOC), Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) iyo qiimeynta khatarta ee meesha fog la joogo.
- Oggolaanshaha hore u jiray iyo awooda lagu kordhinayo oggolaanshaha adeega muddo hal sano ah iyada oo aan la sameynin Qorshaha Taageerada Shakhsi (ISP) oo cusub.

- Barnaamijyada adeegyada bulshada ku saleysan ee isticmaalaya oggolaansho dhanka afka ee loogu talagalay qorshayaasha adeega qofka ku saleysan,
- Waalidinta iyo mas'uuliyiinta carruurta yar yar ee qabta naafanimada maskaxda iyo korrinka (I/DD) ee u adeegaya daryeel bixiyaha lacagta qaata ee ilmahooda ahaan.

ODDS waxay soo saari doontaa wada xiriiro wata amaro iyo tilmaamaha siyaasada rasmiga ah oo lagu taageerayo shaqaalaha iyo hawl wadaagayaasha inta lagu jiro kala guurkani marka PHE-du joogsato. CMS waxaa ka go'an siinta ogeysiin 60-maalmood ah ka hor inta aysan PHE joogsan.

Waad ku mahadsan tihiin dhammaan intiina daryeelaysay dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka inta lagu jiro caqabadaha xaaladan caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee socota.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena .

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la,

dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.